The Lord Will Provide







Some time later God tested Abraham. He said to him, "Abraham!" "Here I am," Abraham replied. **2**Then God said, "Take your son, your only son. He is the one you love. Take Isaac. Go to the place called Moriah. Give your son to me there as a burnt offering. Sacrifice him on the mountain I will show you."

- **3** Early the next morning Abraham got up and loaded his donkey. He took two of his servants and his son Isaac with him. He cut enough wood for the burnt offering. Then he started out for the place God had shown him. **4** On the third day Abraham saw the place a long way off. **5** He said to his servants, "Stay here with the donkey. I and the boy will go over there and worship. Then we'll come back to you."
- **6** Abraham had his son Isaac carry the wood for the burnt offering. He himself carried the fire and the knife. And the two of them walked on together. **7** Then Isaac said to his father Abraham, "Father?"
- "Yes, my son?" Abraham replied. "The fire and wood are here," Isaac said. "But where is the lamb for the burnt offering?"
- **8** Abraham answered, "God himself will provide the lamb for the burnt offering, my son." And the two of them walked on together.
- **9** They reached the place God had shown Abraham. There Abraham built an altar. He arranged the wood on it. He tied up his son Isaac. Abraham placed him on the altar, on top of the wood. **10**Then he reached out his hand. He picked up the knife to kill his son. **11** But the angel of the Lord called out to him from heaven. He said, "Abraham! Abraham!"

"Here I am," Abraham replied. **12** "Do not lay a hand on the boy," he said. "Do not harm him. Now I know that you would do anything for God. You have not held back from me your son, your only son."

13 Abraham looked around. There in a bush he saw a ram caught by its horns. He went over and took the ram. He sacrificed it as a burnt offering instead of his son. **14** So Abraham named that place The Lord Will Provide. To this day people say, "It will be provided on the mountain of the Lord."

15 The angel of the Lord called out to Abraham from heaven a second time. 16 He said, "I am giving you my word that I will bless you. I will bless you because of what you have done," announces the Lord. "You have not held back your son, your only son. 17 So I will certainly bless you. I will make the children born into your family as many as the stars in the sky. I will make them as many as the grains of sand on the seashore. They will take over the cities of their enemies. 18All nations on earth will be blessed because of your children. All these things will happen because you have obeyed me." 19 Then Abraham returned to his servants. They started out together for Beersheba. And Abraham stayed in Beersheba.

From Genesis chapter 22 New International Reader's Version

Bilowgii 22:1-19

Oo waxaa dhacay waxyaalahaas ka dib, in Ilaah tijaabiyey Ibraahim, oo uu ku yidhi, Ibraahimow. Isna wuxuu yidhi, Waa i kan. 2 Markaasuu ku yidhi, Hadda kaxee wiilkaaga keligiis ah, kan aad jeceshahay, oo ah Isxaaq, oo u kac dalka Moriyaah; oo halkaas isaga sida allabari la gubo ku dul bixi buuraha middood oo aan kuu sheegi doono. 3 Oo aroortii horaa Ibraahim kacay, oo wuxuu kooraystay dameerkiisii, oo wuxuu kaxaystay laba ka mid ah dhallinyaradiisii, iyo wiilkiisii Isxaaq; qoryihiina allabariga la gubo wuu u jeexjeexay, wuuna kacay, oo wuxuu tegey meeshii Ilaah u sheegay. 4 Maalintii saddexaad ayuu Ibraahim indhihiisa kor u taagay, markaasuu meeshii oo ka fog arkay. 5 Ibraahimna wuxuu raggiisii dhallinyarada ahaa ku yidhi, Idinku halkan dameerka la jooga, aniga iyo wiilkuna halkoo baannu tegaynaa oo Ilaah ku soo caabudaynaa, dabadeedna waannu idinku soo noqonaynaa. 6Ibraahimna wuxuu gaaday goryihii allabariga la gubo, oo wuxuu saaray wiilkiisii Isxaaq, isna wuxuu gacantiisa ku qaaday dabkii iyo mindidii; markaasay labadoodiiba israaceen. 7 Isxaagna waa la hadlay aabbihiis Ibraahim, oo yidhi, Aabbow, Isna wuxuu yidhi, Waa i kan, wiilkaygiiyow, Markaasuu ku yidhi, Bal eeg, waa kuwan dabkii iyo qoryihii, laakiinse meeh wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa? 8 Ibraahimna wuxuu yidhi, Ilaah gudhiisaa keeni doona wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa, wiilkaygiiyow; saas daraaddeed labadoodiiba way israaceen. 9 Oo waxay yimaadeen meeshii Ilaah isaga u sheegay; Ibraahimna meeshaasuu ka dhisay meeshii allabariga, qoryihiina wuu hagaajiyey, markaasuu xidhay wiilkiisii Isxaaq, oo meeshii allabariga saaray qoryihii dushooda.10 Ibraahimna gacantiisii buu fidiyey, oo mindidii buu u gaaday inuu wiilkiisii dilo. 11 Markaasay malaa'igtii Rabbigu samada uga yeedhay isaga, oo waxay ku tidhi, Ibraahimow, Ibraahimow. Kolkaasuu yidhi, Waa i kan. 12 Markaasay ku tidhi, Gacantaada ha saarin wiilka, waxbana ha ku samaynin: waayo, hadda waan garanayaa inaad Ilaah ka cabsatid, maxaa yeelay, igama aadan lexejeclaysan wiilkaaga, kaas oo ahaa wiilkaaga keligiis ah. 13 Markaasaa Ibraahim indhihiisii kor u taagay, oo wax fiiriyey, oo wuxuu dabadiisa ku arkay wan geesaha kayn kula jira. Markaasaa Ibraahim tegey oo wankii soo kaxeeyey, oo wuxuu u bixiyey allabari guban meeshii wiilkiisa. 14 Ibraahimna meeshaas wuxuu u bixiyey Yehowah Yireh; xataa ilaa maanta waxaa la yidhaahdaa, Buurta Rabbiga ayaa lagu arki doonaa. 15 Kolkaasaa mar labaad malaa'igtii Rabbigu Ibraahim samada uga yeedhay, 16 oo waxay ku tidhi, Rabbigu wuxuu yidhi, Waxan aad samaysay aawadood, iyo wiilkaaga aadan iga lexejeclaysan, kaas oo ah wiilkaaga keligiis ah aawadiis ayaan nafsaddayda ku dhaartay 17 inaan barako ku barakayn doono, oo aan farcankaaga u tarmin doono sida xiddigaha cirka, iyo sida cammuudda taal badda xeebteeda; oo uu farcankaaguna hantiyi doono cadaawayaashiisa iriddooda; 18 oo ay quruumaha dunida oo dhammu ku barakoobi doonaan farcankaaga, maxaa yeelay, codkaygaad addeecday.19 Haddaba Ibraahim wuxuu ku noqday raggiisii dhallinyarada ahaa, markaasay kaceen oo waxay wada tageen Bi'ir Shebac, Ibraahimna wuxuu iska degay Bi'ir Shebac.